**Woodland Centers**
**Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda Macmiilka**

**XUQUUQDA MACMIILKA:** Macmiil kasta waxa uu xaq u leeyahay:

- Si aan iilasho laheyn loogu fidiyo daaweyn iyada oo aan loo eegin qowmiyadda, midabka, diinta, doorashada galmoodka, halka uu asal ahaan ka soo jeedo, xaaladda bulshada, da'da naafanimo ama xaaladda gargaarka dadweynaha ee la siiyo.
- Ixtiraam iyo soo dhaweyn oo lagu ilaaliyo sharaftiisa/teeda marka loo fidinayo daryeelka ama daaweynta.
- In loo fududeeyo adeegga isfahamka gaar ahaan bukaanka ku hadla af aan aheyn afka Ingiriisiga.
- In la siiyo odhaahda xuquuqda bukaanka oo qoraal ah.
- In loo xaqiijiyo qarsoodi ka dhigista macluumaadka iyada oo la raacayo qorshaha caafimaadka iyo inta sharciyada gobol iyo kuwa dawladda dhexe ogolyihiin. Ogeysiiska Woodland Centers ee Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka ayaa faahfaahinaya xaaladdaha la isticmaali karo ama la sii gudbin karo macluumaadka caafimaadka ee sharcigu ilaaliyey; marka laga reebo xaaladaha dharcigu ogol yahay oo ay waajib tahay in la soo sheego dhaqan xumo ama xad gudub loo geysto ilmo yar ama qof nugul.
- Qarsoodi Ka Dhigista
- Codsan karo aragtida la taliye oo macmiilku kharashka bixinayo ama codsi uu codsanayo in qof kale dib u eego qorshaha daaweynta qof ahaaneed sida ku xusan nidaamka u degsan xarunta.
- uu diidi karo daryeelka ama ka qeyb qaadashada daaweynta.
- in aad hesho daaweyn adiga guud ah oo ay ka mid yihiin:
    - in laguula dhaqmo si bini'aadminimo leh iyada oo aan loo eegin halka aad ka hesho gargaarka maaliyadeed;
    - in laguugu qabto adeegga iyada oo aan xorriyadda lagaa qaadin wixii aad doontana aad qabsan karto intii suurogal ah;
    - in laguu dajiyo qorshe daaweyn oo adiga kuu gaar ah.
    - in ay ka qeyb qaadan karaan qorshada daaweynta bukaanka 12 sano jirka ah ama ka weyn iyo waalidiintooda ama qofka mas'uulka ka ah.
    - in aad dib ugu noqon karto qorshaha daaweynta markii muddo la joogaba; iyo
    - in ay adeegga kuu qabtaan shaqaale u tababaran oo aqoon u leh adeegga ay kuu qabanayaan iyo horjoogayaal la socda fulinta qorshaha daaweynta.
- markii ay ku haboon tahay, adiga, qoyskaaga ama qof sharci ahaan wakiil kaa ah ayaa ka wargelinayaa waxyaabaha soo socdaa:
    - xuquuqdaada, oo ay ka mid yihiin xuquuqda qarsoodi ka dhigista macluumaadkaaga;
    - nooca daryeelka, nidaamka caafimaadka, iyo daaweynta laguu fidinayo;
    - sharciyada iyo nidaamka u degsan dhismaha ee adiga ku khuseeya;
    - qiimaha adeegga laguu qabto, la kala dhigdhigay markii ay suurogal tahay;
    - cidda bixineysa kharashka adeegga caafimaadka iyo haddii ay jiraan wax xadidaad ah oo ku saabsan mudada adeegga;
    - mas'uuliyadda shaqaalaha ee ku aadan daryeelkaaga, heerkooda aqooneed, iyo xiriirka shaqaalaha.
    - sababta loo sameynayo haddii uu jiro isbedel la sameeyo ama bukaanka loo wareejiyo meel kale oo isla dhismaha gudihiisa ama ka baxsan dhismaha.
    - Isticmaalka xilligan iyo mustaqbalka ee qalabka iyo waxyaabaha kale ee lagula socdo bukaanka, sida miraayadaha dhinac kaliya laga arko, kaamarooyinka dhismaha, cajaladaha duubitaanka, filimada, ama sawirada.
    - in lagu wargeliyo khatarta, iyo faa'iidada aad ka heleyso nidaamka daaweynta ee la isticmaalay, gaar ahaan kuwa gacanta laga qabto ama tijaabada ku jira.
    - daaweynta bedelka ah ee la heli karo.
    - xaqa aad u leedahay in aad diido in aad kla qeyb qaadato mashruucyada cilmi baarista ah iyada oo aan waxba laga bedelin adeegga;
    - xaqa aad u leedahay, inta uu sharcigu ogol yahay, in aad diidi karto nidaam daaweyn oo gaar ah;
    - marka uu macmiilku diido daaweynta, waa mas'uuliyadda isbitaalka in ay raadiyaan dariiqo kale oo sharci ahaan bedeli karta ama ku faraysa qaadashada daawada iyada oo aan cidina kugu khasbin,iyada oo la raacayo heerarka xirfadda, si loo joojiyo xiriirka bukaanka la wargeliyo ogeysiiska xilli suurogal ah;
    - qorshaha ka saaridda isbitaalka;
    - qorshaha lagu sii wadayo baahidaada caafimaadka iyo dhimirka ka dib marka lagaa saaro isbitaalka; iyo
    - xaqa aad u leedahay in aad cabasho ama dacwo soo gudbin karto taasoo ka dhigan in aad codsan karto dhageysi la dhageysto dacwadaada nidaamka xalinta khilaafaad ee Woodland Centers waxaa lagu dhajiyey goobaha laga soo galo Woodland Centers. Cabashada ku saabsan jabinta xuquuqda macaamiisha, oo ay ka mid tahay xuquuqda qarsoodi ka dhigista, waxaa loo soo gudbin karaa:
        - **Woodland Centers' Client Services Representative,** P.O. Box 787,Willmar, MN 56201 (320- 235-4613)
    - Haddii aadan ku qanacsaneyn jawaabta cabashadaada ama dacwadaada laga bixiyey, waxa aad u soo gudbin kartaa:
        - **Department of Human Rights (Waaxda Xuquuqda Aadanaha)**, State Office Building, St. Paul, MN 55155 (800-657-3704) or,

- **Division of Licensing (Qeybta Leedsinada)**, Department of Human Services Building, 444 Lafayette Road North, St. Paul, MN 55155
  (651-431-6500)

- In ay kuu fidiyaan adeegga iyaga oo aan kuu geysan xadgudub la xiriira galmoodka. Taas waxaa ka mid ah dhunkasho, shukaansi, taabashao galmood la xiriirta, jirkaaga isticmaalaan ama ay kula sameeyaan wax la xiriira galmoodka.

- laguu ogolaado in aad ka shaqeyeso Woodland Cetnters haddii aad ka soo baxdo shuruudahan:
  - shaqadu waxa ay qeyb ka tahay dajiyo qorshe daaweyn oo adiga kuu gaar ah.
  - shaqadu waa in ay noqotaa mid mutadawac ah;
  - macmiilka waxaa la siiyaa abaalmarin oo u dhiganta qiimaha shaqada uu qabtay; iyo
  - Mashruuca shaqadu waa inuu yahay mid waafaqsan sharciyada degaanka, kuwa gobolka iyo kuwa dawladda dhexe.
    - **Fiiro gaar ah:** Shaqaalaha waxaa la weydiisan karaa inuu nadaafadda ka shaqeeyo iyada oo aan laga siin wax abaal marin ah.
- in aad ka hortimaado sida ay sax u tahay ama u dhameystiran tahay xogta aan ku heyno diiwaanka caafimaadka;
- in qarsoodi laga dhigo macluumaadka shaqsiga ah iyo kan daaweynta iyo ogolaashaha, xaaladaha qaarkood, diidmada in loo gudbiyo dhinac kale oo ka baxsan xarunta caafimaaka.
- In aad su'aalo ka keeni karto oo lagaaga jawaabo su'aalahaaga iyo codsiyada.

**XUQUUQDA BUKAANKA ISBITAALKA LA DHIGO:** Kuwo waa xuquuqo dheeraad ah ee kuwo kor ku xusan:

- in lagu siiyo amarka dhakhtarka oo kugu adkeynaya in aad sariirta ku nagaato ama kaa mamnuucayn in aad dibadda u baxdo oo sedexdii maalmood ee kastaba dib loo eego.
- in aad qorsheyso in laguugu sameeyo dhaqdhaqaaqa iyo jimicsiga haddii aad naafo tahay ama qof sariir ku urursan.
- in qoyskaaga iyo qofka aad xiriirka la leedahay iyada, ay ku soo booqan karaan booqashadaas aheyn mid caafimaadkaaga liddi ku ah.
- in laguu diro adiguna aad diri karto warqadaha boostada iyada oo aysan jirin wax caqabad ah.
- in aad talefoonka si gaar ah oo qarsoodi ah kula sheekeysan karto qoyskaaga iyo saaxiibadaa haddii aysan dhibaato ku aheyn caafimaadkaaga.
- in ay mar kasta ku soo booqan karaan dhakhtarkaaga, la taliyayaasha xagga diinta, ama qareenada. Wixii xakameyn ah ee lagu soo rogo booqashada, wicitaanka telefoonka, iyo xiriirka waxaa qiimeynaya sida ay wax uga tarayaan daaweynta shaqaalaha ku shaqada leh hal mar todobadii cishaba.
- in aad leedahay meel gaar ah oo dadku si gaar ah kuugu soo booqan karaan haddii aanay taasi liddi ku aheyn daaweynta.
- in adiga iyo qoyskaaga ka wada qeyb qaadataan, marka ay ku haboon tahay, loona eegayo xadidaadda lagu soo rogay booqashada, wicitaanka telefoonka, ama hababka kale ee lagu wada xiriiro marka ay muhiim tahay. Xadidaadaas oo dhan waa in adiga iyo qoyskaaga si wanaagsan loogu faahfaahiyo.

**MAS'UULIYADDA MACMIILKA:** Si loo ilaaliyo sharafta iyo xuquuqda bukaanka, waxaa laga filayaa in bukaanku qaado mas'uuliyadaha qaarkood. Kuwaad waxaa ka mi ah:

- In aad wargeliso shaqaalaha daryeelka haddii aad dooneyso in aad raacdo ama adan raacin qorshaha daaweynta ee laguu dajiyo?
- in aad fahamto dhibaatada ku heysata iyo qorshaha daaweynta. Waa muhim in aad fahamto dhibaatada ku heysata si loogu guuleysto qorshaha daaweynta. Haddii ay jiraan wax aadan fahmin weydii. in aad noqoto macmiil wanaagsan mincanheedu ma aha in aad aamusnaato.
- in aad wargeliso shaqaalaha daryeelka wixii kale oo daryeel ah oo aad u baahan tahay ama marka aad soo noqoto.
- Wargeli shaqaalaha daryeelka sida aad dareemeyso waxyaabaha noloshaada ku saabsan. Daacad ahoow oo runta ka sheeg.
- wargeli shaqaalaha caafimaadka isbedelka ku soo kordha caafimaadkaaga.
- Ixtiraam xuquuqda macaamiisha kale iyo shaqaalaha isbitaalka ee isticmaalaya barnaamijyada.
- ixtiraamka iyo dhawritaanka waxyaabaha dadka kale qarsoodiga u ah.
- in aad xarunta la soo xiriirto ugu yaraan 24 saac ka hor marka aadan balanta imaan karin.

**XUQUUQDA SHAQAALAHA IYO MAS'UULIYADAHA:** shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin in ay qarsoodi helaan. Macaamiishu waa in ay la xiriiraan Khadka Gurmadka halkii ay dhakhtarka gurigiisa kala xiriiri lahaayeen. Shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin in ay talo weydiistaan xaalad kasta. Shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin in ay ku taliyaan wareejin ama meel kale bukaanka ugu diraan daaweyn marka uusan macmiilku la shaqeyneyn. Shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin in joojiyaan daaweynta macmiilka haddii balanta uu yimaado isaga oo cabsan ama isticmaalay maandooriye waxaana suurogal ah in loo diro barnaamijyada kale si loo sugo amaanka. Shaqaalaha mas'uuliyad ayaa ka saaran in ay soo sheegaan ilmo ama qof nugul oo si xun loola dhaqmay ama handadaad loo geystay sida lagu qeexay sharciyada. Shaqaalaha mas'uuliyad ayaa ka saaran in ay soo sheegaan sida sharciga lagu qeexay haddii uu macmiilku geystay ama la yimaada handadaad fal dambiyeed ku aadan barnaamijka ama qof u shaqeeya barnaamijka. Shaqaalaha waxaa waajib loogu leeyahay in aysan wax la xiriira galmoodka u geysan macmiilka. Shaqaalaha waxaa xaq loogu leeyahay in aysan macmiilka kala qeyb qaadan wax la xiriira galmoodka. Labada waxaa ka mid ah dhunkasho, shukaansi, taabashao galmood la xiriirta, jirkaaga isticmaalaan ama ay la sameeyaan macmiilka wax la xiriira galmoodka ha ahaado ama yuusan ahaan mid iminka daaweyn u socoto.